

# Guddoomiyaha gobolka waxaa ka go'an sidii loo heli lahaa bulsho xooggan, oo kala duwan

Abril 14, 2023

Guddoomiyaha gobolka Danielle Smith wuxuu sameeyay Golaha Gobolka ee Dhaqamada kala duwan qaabilsan, kaasoo ah gole loola dan leeyahay sare u qaadidda kala duwanaanshaha dhaqamada Alberta.

Alberta waxay hoy u tahay dad kasoo kala jeeda isirro, diimo iyo dhaqamo kala duwan. Dowladda Alberta waxay aaminsan tahay in kala duwanaanshaha dhaqamadu ay qayb muhiim ah ka tahay arrinka isku haya gobolka. Golaha Gobolka ee Kala duwanaanshaha dhaqanku wuxuu talooyin siin doonaa dowladda si loo xaqijiyo sidii bulshooyinka Alberta u noqon lahaayeen kuwo xooggan qof kastana soo dhaweeya.

Golaha cusub wuxuu kasoo talo bixin doonaa qaababka ugu wanaagsan ee loo taageeri karo, loo dhiirigalin karo sarena loogu qaadi karo kala duwanaanshaha dhaqanka, iskujirka bulshada iyo wax isdhaafsiga dhanka tacliinta ah. Shaqadanu waxay sii wadi doontaa in ay gacan ka gaysato dhisidda bulsho iskudhafan ayada oo dadku dareemayaan in la ixtiraamayo, la qiimaynayo lana xushmaynayo.

“Iskudhnaanta bulshada Alberta waa mid kamid ah meelaha aynu ugu xoogannahay waana tiir muhiim u ah dhisidda mustaqbal ifiya oo uu qof walbaba oo bulshadeena kamid ahi helo. Hadafkeenu waa sii wadidda qaabaynta gobolka ayada oo qof walba uu dareemayo in uu wax ka leeyahay, ayada oo dhaqanka, luuqadda iyo diinta qofka kaliya aan la ixtiraamin ee sidoo kalena la qiimeeyo. Wuxaan uhanqal taagaynaa shaqada golaha cusub oo naga caawin doontaa hiigashada arrinkaan.”

*Danielle Smith, Guddoomiyaha Gobolka*

Ayada oo ay hoggaaminayaan labada guddoomiye, Sumita Anand iyo Philomina Okeke-Ihejirika, golaha 30ka xubnood ka kooban wuxuu gacan ka gaysan doonaa hagista dowladda dadaalada Alberta ay ku xiriir adag kula samaynayso bulshooyinka kala duwan ee gobolku mattalo. Marka la abuuro wacyi galinta ku saabsan isdhhexgalka dhanka dhaqanka, fahmizza iyo garowsiga, dadka reer Alberta waxay si wanaagsan awood ugu yeelan doonaan sidii ay xiriiro cusub oo xooggan u samaysan lahaayeen.

“Waxaan ku faraxsanahay in aan shaaciyo samaynta Golaha Dhaqamada Kala duwan ee Guddoomiyaha gobolka. Kala duwanaanshaha dhaqanku waa tiir muhiim u ah bulshada iyo dhaqaalaha Alberta. Hoggaamiyeeyasha bulshada ee golahaan kujira waxay ka faa’iidaynsan doonaan fahamkooda qimaha leh iyo khibraddooda si ay si wanaagsan ugu faahfaahiyaan baahiyaha, arrimaha iyo tabashooyinka bulshooyinka kala duwan ee gobolkeenna. Alberta waa figta sare ee fursadda iyo rajada. Wuxaanu soo jiidanaa dad ka imaanaya dunida dacaladeeda si ay gobolkaan uga dhigtaan hoygooda. Arrintan lagu dhawaaqay waa tallaabo loo qaaday dhinaca xaqijinta in Alberta ay sii ahaato mid dadka soo dhaweysa, bulsho loo dhan yahay oo ammaan u ah dhammaan dadka ree Alberta.”

*Rajan Sawhney, Wasiirka Ganacsiga, Socdaalka iyo Kala duwanaanshaha Dhaqamada*

## **Qorshe Howleedka Kahortagga Cunsurinimada ee Alberta**

Dowladda Alberta waxay guud ahaanba canbaaraynaysaa nooc kasta oo cunsurinimo iyo nacayb ah. Hawlgal joogto ah iyo tallaabooyin ayaa la qaadi doonaa si loo xaqijiyo in kala duwanaanshaha dhaqanku ahaado tiirkha isku xiraya bulshada Alberta iyo in qof walba uu Alberta u aqoonsado Alberta hoy, taasoo aanay ka jirin takoor iyo nacayb.

Golaha Kala duwanaanshaha dhaqanka ee Gobolku wuxuu gacan ka gaysan doonaa dhammaystirka shaqada Golaha Talo bixinta Ka hortagga Cunsurinimada ee Alberta (Alberta Anti-Racism Advisory Council, AARAC), kaasoo la aasaasay 2022.

Sannadkii 2022, AARAC waxay shaacisay warbixintooda Qorshe Howleedka Kahortagga Cunsurinnimada ee Alberta: Ayada oo ujeedadu tahay xoojinta Isku dhafnaanta iyo Wadajirka, waxaa la aqoonsaday 28 shaqo oo dowladda Alberta laga rabo in ay qaaddo si loogu dhiirigaliyo dadka reer Alberta sidii midba midka kale u aqbali lahaa. Ilaa hadda, todobo kamid ah shaqooyinkaaas ayaa la dhammaystiray, 12 ayaa socota sagaalna waxay u diyaarsan yihiin in la qiimeeyo lagana hawlgalo. Marka laga tago shaqooyinkan, dowladda Alberta waxay qaadday tallaabo, ay ka mid tahay soo afjaridda dhaqanka qorista xogta

shakhsiga ah, ayada oo dib u habayn ku samaysay *Xeerka Booliska*, ayada oo abuuray Unugga Iskudubaridka Fal danbiyeedyada Nacaybka ah ee Alberta iyo Xaafiiska Bulshada ee Fal danbiyeedyada Nacaybka ah, abuurista barnaamijka deeqaha Kaabeyaasha Amniga, abuurista deeqaha kahortagga cunsurinimada iyo dhaqamada kala duwan, iyo bixinta deeqaha loogu tala galay dhaqamada kala duwan ee xirfadaha ganacsiga iyo tababarka shaqada.

Asaga oo garowsan muhiimadda ay leedahay hindise kasta oo lagu sheegay Qorshe Howleedka Kahortagga Cunsurinimada Alberta, Guddoomiye Smith wuxuu wasiirada ku shaqada leh amray in ay dhammaystiraan shaqo kasta ugu danbayn sannad miisaaniyadeedka 2023-24. Si hadafkaan loo gaaro, Guddoomiye Smith wuxuu ballan qaaday in deeq dhammaystiran la siin diino meelaha ay muhiimka tahay si hindiseyaashan loo dhammaystiro.

“Alberta waxaa in badan lagu yaqaanaa meel dhaqama kala duwan leh oo ay joogaan dad leh dhaqamo, luuqado iyo isirro kala duwan. Dhul fursado leh, laakiin waxa wali caqabadaha ku keenaya ayaa ah dadka isir ahaanta u kala qaybsan ee gobolkeenna. Wax ka qabashada cunsurinimada, takoorka iyo sinnaan la'aantu waxay u baahan tahay in si gaar ah diirada loo saaro, waxaanaanu ku faraxsanahay in Golaha Kala duwanaanshaha dhaqanka ee Gobolku ay la shaqayn doonaan Golaha Talo bixinta Kahortagga Cunsurinimada ee Alberta si jiilka soo socda ee reer Alberta loogu helo mustaqal ifaya.”

*Kaycee Madu, Wasiirka Ganacsiga Xirfadaha leh iyo Mihnadaha*

## **Xaqiiqooyinka kooban**

- 4,177,720 qof ee reer Alberta ah:
  - 27.8 boqolkiiba (1,161,420) ayaa ah dadka laga tirada badan yahay
  - 23.2 boqolkiiba (970,975) waa soo galooti
  - 6.8 boqolkiiba (284,465) waa dadka asalka ah
- Saamiga dadka reer Alberta ee kasoo jeeda dhaqamada kala duwan (bulshada laga tirada badan yahay) wuxuu afar jibaarmay oo gaaray 1,161,420 2021 asaga oo kor uga soo kacay 269,280 oo uu 1996kii ahaa.
- Xubnaha buuxa ee golaha waxaa kamid ah:
  - Sumita Anand (la-gudoomiye)
  - Philomina Okeke-Ihejirika (la-gudoomiye)
  - Ali Eltayeb
  - Ali Rakka

- Alphonse Ahola
- Buta Singh Rehill
- Charles Yang
- Charlie Wu
- Dahlia Mostafa
- Ebenezer Asare
- Erick Estrada
- Hussein Warsame
- Rekha Gadhia
- Sherrisa Celis
- SunJong Chun
- Tariq Khan
- Thomas Cheuk
- WaLe Balogun
- Basir Saleh
- Gurbachan Singh Paul
- Holly Mah
- Jackie Halpern
- Jibril Ibrahim
- Justin Jimmy
- Payman Esmaili
- Rick Walters
- Rolando Inzunza
- Thomas Eapen
- Virginia Sumalinog
- Sheliza Kluge
- Xubnaha goluhu waxay raadin doonaan qaabab:
  - sare loogu qado isfahamka dhaqamada kala duwan looguna dabaaldago bulshooyinka dhaqamada kala duwan leh
  - lagu taageerayo hindiseyaasha dhaqanka ee cusub iyo fursadaha isdhexgalka bulshooyinka kala duwan
  - kordhin lahaa hindiseyaasha waxbarashada iyo wacyigalinta bulshada ee ku saabsan muhiimadda kala duwanaanshaha
  - kordhintu fursadaha dadka Asalka ah iyo dadka soo galootiga ah si ay dadka ula wadaagaan xirfadahooda iyo hibooyinkooda ugana qaybqaataan kobaca dhaqaalaha Alberta

- abuurista gobol qof walbaaba dareemayo in uu qayb ka yahay dhaqankiisa iyo hidhiisana lagu qiimaynayo
- ka qayb qaadashada meelmarinta tallaabooyinka ku cad Qorshe Howleedka Kahortagga Cunsurinimada Alberta
- soo diyaarinta shuruucda kahortagga cunsurinimada si wax looga qabto xogaha aan dhammayska tirnayn ee la aruuriyo ayada oo isirka lagu salaynayo si loola dagaalamo takoorka la xiriira goobaha shaqada iyo shaqooyinkaba
- sii wadidda la shaqaynta dowladda federaalka ah si sare loogu qaado sharciga kahortagga fal danbiyeedyada nacaybka ah
- aasaaska barnamijyada la talinta ee loogu talo galay xirfadleyaasha caalamiga ah ee dalka dibadiisa lagu tababaray

## **Macluumaadka la xiriira**

- [Golaha Kala duwanaanshaha Dhaqanka ee Gobolka](#)
- [Qorshe Howleedka Kahortagga Cunsurinimada ee Alberta - Xoojinta Kala Duwanaanshaha iyo wadajirka](#)
- [Golaha Ka Tala Bixinta Kahortagga Cunsurinimada Alberta](#)

## **Warbaahinta kala duwan**

- [Daawo warar saxaafadeedyada](#)
- [Dhagayso war saxaafadeedyada](#)